Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Febraayo 11, 2021

Ku socota: Dhammaan Daneeyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Fadlan qaado ra'yi ururintayada si loo wanaajiyo maamulka kiiska

Fikradaadu waa mid loo baahan yahay anaga oo dib u habeynayna sida aan u qabano maamulka kiiska. Fadlan ra'yi ururinta ku buuxi muddo aan ka dambeyn Maarso 12, 2021.

Taariikhda

Hadafka koowaad ee qorshahayaga istiraatiijiyadeed waa in la abuuro nidaam si fudud loo istcimaali karo. Dib u habeynta nidaamkayaga maamulka kiisku waa mid muhiim u ah gaarista hadafkaasi.

Dayrtii 2018, waxaanu heshiis qandaraas la yeelanay Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (HMA) si loo ogaado waxa sida fiican u shaqeynaya dhanka maamulka kiiska iyo waxa si fiican loo qaban kari lahaa. HMA waxay adeegsatay wareysiyo, kooxo meelo kala duwan ka soo jeeda 'focus groups', kulamo, ra'yi ururin iyo weydiimo si ay talooyin u hesho. Qiyaastii 1,000 oo ah daneeyayaasha ku baahsan gobolka ayaa bixiyay talooyin.

Shaqaalaha HMA waxay ugu horreyn diiradda saareen shaqooyinka kala duwan ee maamulka kiiska sida ay soo mareen dadka ku tiirsan taageerooyinku. Tusaale, dadka helaya taageerooyinka, iyo qoysaskooda,

ayaa la weydiiyay hawlaha maamulka kiiska ee ay jeclaan lahaayeen in la wanaajiyo, la ballaariyo ama kor loo qaado.

Waxaanu adeegsanay warbixinta HMA si aanu abuurno qorshe dejin oo dib loogu habeynayo maamulka kiiska. Waa mid la mid ah sida naqshadeeyayaashu u sawirraan naqshadaha si ay u tilmaamaan sida loo guryaha loo dhisho. Tani waxaanu ugu yeeraynaa Mashruuca Qorshe Dejinta. Talooyinka waxaa lagu soo saaray fikrado laga helay maamulayaasha kiiska, dadka u dooda naftooda iyo daneeyayaasha kale. Waxaanu diyaar u ahayn in aanu helno fikrado ku saaban talooyinka la soo jeedinayo laakiin waxaa yimid COVID, markaa waxaa loo baahday in Mashruuca Qorshe Dejinta dib loo dhigo. Waxaa la joogaa waqtigii la heli lahaa fikradaada.

Waa maxay maamulka kiisku?

Si loo hubiyo in aan dhammaanteen leenahay fikrad isku mid oo ku saabsan waxa uu yahay maamulka kiiska, waxaanu soo qaadaneynaa tusaalooyin kooban.

Maamulka kiiska waxaa bixiya loo yaqaano Iskuduwaha Adeegyada ama Wakiilka Shakhsiyeed. Waxay u shaqeeyaan hay'adaha maamulka kiiska, oo sidoo kale oo yaqaano Hay'adaha iyo Barnaamijyada Naafanimada Korriinka Bulshada.

Maamulka kiisku waxay dadka qaba I/DD ka caawiyaan waxyaabaha sida:

- Gacan ka geysashada helitaanka ilaha iyo adeegyada
- Ku xiridda dadka ee macluumaadka
- Qofka, dhisaya qorshaha sanad kasta
- Ka jawaabida su'aalaha
- La socodka caafimaadka, baahiyaha dhanka ammaanka iyo taageerada

Maamulka kiisku wuxuu u ekaan karaa sida wicitaano telefoon, email, wada hadalo fool ka fool ah, kulamo, iyo tixraacyo, waana in loo bixiyaa hab si fiican ugu shaqeynayaa qofka qaba I/DD.

Maxaa dib u habayn loogu sameynayaa maamulka kiiska?

Nidaamka maamulka kiiska oo dib u habayn lagu sameeyo waxaa lagu gaari doonaa laba waxyaabood:

- Doorka iyo mas'uuliyadaha hay'ada maamulka kiiska oo kastaa uu yahay mid cad.
- Hay'ada maamulka kiiska oo kastaa ay u hawl galeyso qaab buuxa oo qofka ku saleysan.

Fadlan buuxi ra'yi ururinta

Fikradaadu waxay naga caawin doonaa in aanu mudnaanta siino waxa aan u baahanahay in aanu qabano. Waxaad awoodi doontaa in aad noo sheegto sida xoogan ee aadan ugu raacsan tahay ama aadan ugu raacsanayn talooyinka la soo jeediyo. Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad dadka la wadaagto fikirka aad ka qabto talooyinka la soo jeediyo

Ra'yi ururinta waxaa la haleyaa iyada oo ku qoran lix luqaddood. Waxaad luqadda aad doorbidayso ka soo dooran kartaa meesha la kala dooranayo ee ku taala dhinaca sare ee midigta ee ra'yi ururinta.

Fadlan ha ka gaabsan in aad ra'yi ururintani la wadaagto dadka kale ee doorka ku leh maamulka kiiska ee I/DD.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta buuxinta ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.